



**DAWLADDA HOOSE EE DEGMADA GAROOWE  
DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**

---

**WARGELIN DAD-WEYNE**

**10 Maarso 2019**

Qorsha Maareynta Deeggaanka iyo Bulshada waxaa loo diyaariyey qaybta hore ee dhismaha waddooyinka magaalada Garoowe oo wadarta cabbirkoodu dhan tahay 4.86 kilomitir. Qorshahani waxa uu ku saleysan yahay Qalfoofka Maareynta Deeggaanka iyo Bulshada, kaas oo horay loo diyaariyey. Sidoo kale Qorshuhu waxa uu ku saleysan yahay Sharciga iyo Xeerarka Dawladda *Puntland* iyo Siyaasadaha Ilaalinta ee Bangiga Adduunka. Mashruuca Dib-u-soo kabashada Magaalooyinka Soomaaliya (oo Garoowe ay ka mid tahay kuwa ka faa'iideysanaya) waxaa maalgelinaya Bangiga Adduunka, waxaana loo aqoonsaday Qeybta 'B' oo macnaheedu tahay in saameyntiisu yar tahay, lana maareyn karo.

Qorshuhu waxa uu soo koobayaa halista iyo saameynta suurtagalka ah ee Mashruucu ku yeelan karo deeggaanka iyo bulshada ku nool goobaha afarta waddo laga dhiso doono. Waxaa kale oo Qorshuhu qeexayaa tallaabooyinka lagu yareyn karo halista iyo saameynta hawlaha mashruuca inta lagu gudajiro fulintooda

Qorshuhu waxa uu hubinayaa in horay loo diyaariyey sahaminta saameynta deeggaanka iyo bulshada iyada oo lala tashanayo dad-weynaha. Sidoo kale habraaca maareynta iyo qorshayaasha lagu qeexay Qorsha guud waxaa tixraac u ah dikumintiyaddii horey loo diyaariyey, kuwaas oo ay ka mid yihiin Qalfoofka Siyaasadda Dib-u-dejinta, Qorshaha Hawlaha Dib-u-dejinta iyo Qalfoofka Maareynta Deegaanka iyo Bulshada. Dikumintiyadan oo dhan waxa ay qeexayaan qorshayaasha ilaalinta bulshada waxaana loo isticmaali doonaa haggida dhammaan tallaabooyinka lagu maareyn doono halista iyo saameynta suurtagalka ah ee mashruucu yeelan karo.

Mahadsanidiin,

Wada Shaqeyn Wacan,